# Dugsiyada Aagga Forest Lake

## 2026 – 2027

## Ardayga & Qoyska

# Buugan gacanta ee Dugsiga Hoose

**Dugsiyada Aagga Forest Lake**
Ku habboon Arday Kasta Maalin Kasta

# Degmo Dugsiyeedka Madaxabanaan #831 | 2026 – 2027 Barta

Geerashka Baska : 651-982-8190
Dugsiga Hoose ee Columbus: 651-982-8900
Waxbarashada Bulshada : 651-982-8110
Xafiiska Degmada: 651-982-8100
Waxbarashada Qoyska ee Dhallaanka: 651-982-8300
Xarunta Waxbarashada: 651-982-3170
Adeega Cuntada: 651-982-8396
Dugsiga Dhexe ee Forest Lake Area: 651-982-3000
Dugsiga Dhexe ee Forest View: 651-982-8200
Dugsiga Dhexe ee Lino Lakes: 651-982-8850
Dugsiga Dhexe ee Linwood: 651-982-1900
SAC/ Sonic: 651-982-8365
Dugsiga Hoose ee Scandia: 651-982-3300
Dugsiga Sare ee Dadka Waawayn: 651-982-8400
Barkada Dabaasha: 651-982-8746
Dugsiga Hoose ee Wyoming: 651-982-8000

Buug-gacmeedka Qoyska ee Little Rangers

Qorshaha Istaraatiijiyada Dugsiga Forest Lake Area

# A

## Adeegyada Caafimaadka

Kaaliyaheena caafimaadka ayaa bixin doona daawooyin, go'aamin doona tallaabada ku habboon xaaladaha degdegga ah, iyo kormeerida maqnaanshaha iyo walaaca caafimaad ee ardayda.

- Daawooyinka: Kaaliyaha caafimaadka waa in lagu wargeliyaa ardayda qaadashada daawo kasta inta lagu jiro maalinta dugsiga.  Dhammaan daawooyinka (daawoyinka laguu soo qoray iyo kuwa dukaamada laga soo iibsado) waa in lagu bixiyaa Xafiiska Caafimaadka.
- Daawooyinka dhakhtarku qoray waa inay ku yimaadaan dugsiga baakada asalka ah, oo uu si sax ah farmashiistaha ugu calaamadiyay, waana inay la socdaan qoraalada adiga iyo dhakhtarkaaga.  Farmashiistayaashu waxay bixin doonaan laba dhalo oo daawada ah marka laga codsado (mid guriga iyo mid dugsiga)
- Daawooyinka laga soo gato meelaha kale (oo ay kujiraan goojada qufaca) waa inay la socoto ogeysiis dhakhtar oo ka socda waalidka ama masuulka.  Qoraalku waa inuu si gaar ah oga hadlaayo kuurada, waqtiga maalintii la qaadanaayo, muddada, iwm. Haddii daawooyinka la qaato wax ka badan labo asbuuc waa inaad soo dirto qoraal ka socda dhakhtarkaaga.
- Qiimeynta Araga iyo maqalka: Qiimeynta araga iyo maqalka ayaa la sameyn doonaa sida ku xusan soojeedinada Waaxda Caafimaadka Gobalka. Ardayda fasalada 3 iyo 5 waxaa laga qaadaa baaritaan sanad kasta. Waalidiinta waxaa ogeysiin doona dugsiga haddii imtixaan xirfadeed loo baahdo. La xariira dugsiga haddii aad dooneyso baaritaan arag iyo maqal oo gaar ah.
- Diiwaanada Caafimaadka: Diiwaanka caafimaadka waa loo kaydiyaa arday kasta. Waxaa ku qoran diiwaanka ilmaha laga bilaabo dugsiga xanaanada ilaa fasalka 12 aad. Waalidiintu waa inay ku wargeliyaan dugsiga dhibaatooyinka caafimaad ee ilmahooda haysta si xogta diiwaanka caafimaadka iyo tilmaamaha loo cusbooneysiiyo.

## Amniga Dugsiga

Waa mas'uuliyadeena inaan hubino ardaydeena inay badbaado qabaan markay dugsiga joogaan. Albaabadeena laga soo galo way xiran yihiin billoowga maalinta dugsiga. Waxaad u baahan doontaa in lagugu hadlo xafiiska si aad u gasho dhismaha. Booqdayaasha waxa looga baahan doonaa inay soo bandhigaan aqoonsi dawladeed oo sax ah iyo inay xirtaan calaamad/istiikaad booqdaha inta ay dhismaha ku jiraan. Shaqaalaha dugsigu waxay su'aalo waydiin doonaan qof kasta oo qaangaar ah oo kujira dhismaha oo aan haysan wax calaamad ah waxayna u diri doonaan xaafiiska. Shaqaalaha dugsiga dhexe waxay xirtaan calaamada dugsiga degmada Forest Lake si ay isku aqoonsadaan.

## Anshaxa xadgudubka ah iyo kan shakiga keena / dareenka galmada

Ma jiro arday, qandaraasle madaxbanaan ama xubin shaqaale ah oo ku lug yeelan kara anshaxa xadgudub ama xumaan ama dareen galmo oo ka dhan ah arday kasta, qandaraasle madaxbannaan ama xubin shaqaalaha kamid ah oo ku lug leh jinsiyad, midab, caqiido, asal qaran, jinsi, da', xaalad guur, xaalad la xiriirta kaalmada dadweynaha, naafo, diin, xadgudub galmo, iyo nooca galmada iyo aqoonsiga jinsiga.

## App-ka Raadraaca Baska

Waxaan hirgelinnay My Ride, oo ah aab qoysaska ardayda raacda basaskeena u saamaxaya inay la socdaan baska. Barnaamijkan wuxuu u ogolaanayaa qoysaska ama ardayda inay la socdaan baskooda waqtiga dhabta ah markay ku safrayaan wadadooda.

Tilmaamaha faahfaahsan ee soo dejinta iyo isticmaalka My Ride waxaa laga heli karaa webseedka gaadiidka degmada.

Barnaamijkan wuxuu si gaar ah u caawin doonaa qoysaska xilliga jiilaalka marka xaalada waddooyinka ay sababi karto dib u dhac basaska. App-kani wuxuu qoysaska u yahay hab ay ku raadraacaan baskooda waqti dhab ah. Ma bixiso ogeysiisyo ku salaysan masaafo, si kastaba ha noqotee, haddana dadka isticmaala app-ka waxay heli karaan ogeysiisyo ka imanaya shaqaalaha gaadiidka haddii ay jiraan dib-u-dhac weyn ama warar cusub oo qoysasku u baahan yihiin inay ogaadaan.

# B

## Baaritaanka lookiiyinka ardayda, miisaska, iyo alaabahooda iyo waxyaabaha gaarka u ah

Dadaalka lagu ilaalinaayo badqabka ardayda, shaqaalaha dugsigu waxa laga yaabaa inay baari karaan agabka dugsiga waqti kasta. Fadlan eeg lifaaqaan, [Siyaasada Gollaha Dugsiga #514](#) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

## Baaskiil wadida  & U lugeynta Dugsiga

Ardayda fasalada 3, 4 iyo 5 waxay baaskiil u kaxeysan karaan ama u lugeyn karaan dugsiga ayadoon qofna la socon qof weyn. K, ardayda fasalka 1aad iyo 2aad waxay baaskiil u kaxeysan karaan ama u lugeyn karaan dugsiga ayagoo uu wehliyo qof wayn ama qof walaal ah oo wayn oo dhigta fasalada 3-5. Waa inay soo gudbiyaan ogeysiis saxiixan oo uu qoray waalidkooda ama masuulkooda. Ardayda waxaa si *awood leh* loogu dhiirigelinayaa inay xirtaan koofida baaskiilka iyo inay u hogaansamaan dhammaan sharciyada badqabka baaskiilka. Sababo la xariira walaacyada badqabka arrintaan lagama oggola Linwood iyo Dugsiga Dhexe ee Columbus.

## Badelka Xaalada Qoyska

Fadlan wixii isbeddel ah ee ku yimaadda xaaladda qoyskaaga ka cusboonaysii ParentVUE. Tani waxa kujiri kara ciwaan cusub, lambar telefoon oo cusub (guri ama shaqada), shaqada waalidka, badelka xaaladda guurka ama badelka xannaanada. Macluumaadkaan ayaa lagama maarmaan u ah diiwaanadeena haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah, waxaana laga dhigaa qarsoodi.

Daryeelaha *Mutadawiciinta Dheeraadka ah Chaperones See*

## Balanqaadka Daacadnimo

Sharciga gobalku wuxuu dhigayaa in dhammaan ardayda sameeyaan ballanqaad daacad ah ugu yaraan hal mar asbuucii. Haddii arday gaar ah ama xubin kamid ah shaqaalaha uusan doonayn inuu ka qaybqaato, wuxuu dooran karaa inuusan sidaas samayn, ixtiraamna waa inay muujiyaan ardayda iyo shaqaalaha kale ee ku saabsan xaqa ay u leeyihiin inay doortaan.

## Barnaamijka Anshaxa

Dugsi hoose kasta wuxuu taageeraa hab-dhaqanka ardayda isagoo hirgelinaya Positive Behavior Interventions and Supports (Wax-ka-qabashada iyo Taageerada Habdhaqanka Wanaagsan, PBIS), oo ah qaab-dhismeed cilmi-baaris ku salaysan oo si horudhac ah loogu baro laguna taageero hab-dhaqannada wanaagsan ee dhammaan ardayda.  Habkan dugsiga oo dhan laga hirgeliyo wuxuu xoogga saaraa dhisidda jawi ammaan ah oo wanaagsan oo ay DHAMMAAN ardaydu wax ku baran karaan. Barnaamijku wuxuu ku salaysan yahay yoolalka soo socda: Ilaali Badqabka, Muuji Naxariis Badan oo noqo Qof Mas'uul ah.

## Bayaanka Takoor la'aanta

1 . Waa siyaasada School Board of School District 831 inay u hoggaansamaan sharciga federaalka iyo kan gobolka (iyo dhammaan shuruudaha lagu soo rogay ama la raacaayo qawaaniinta la soo saaray ee taageeraya sharciyadaan) ee mamnuucaya takoorka qof kasta iyadoo loo eegayo isirka, midabka, qaranka, asal ahaan, caqiido, diin, lab iyo dheddig, heerka guurka, xaaladda marka la eego kaalmada dadweynaha, da'da, naafonimada, ama nooca galmada.
2 . Qofna lagama saari karo kaqaybgalka, looma diidi karo dheefaha, ama si kale loogama takoori karo barnaamij kasta oo waxbarasho, ama shaqaaleysiin, shaqo siin, tixgelin, ama xulashada shaqaaleysiinta (haddii ay tahay waqti buuxa ama waqti dhiman) mid kasta barnaamij waxbarasho oo ay maamusho degmada ay ka hesho kaalmada maaliyadeed ee federaalka.
3 . Macalimiinta ama ardaydu waa inay la xiriiraan shaqsiyaadka soo socda marka ay jiraan welwel ama cabashooyinka ku saabsan takoorka, ama jinsiga, diinta, xadgudubka jinsiyadeed ama rabshadaha:
Donna Friedmann, Agaasimada Maamulka iyo Ilaha Bulshada (651-982-8123)
Kelly Wilson, Agaasimada Waxbarashada Gaarka ah  (651-982-8129)

## Bii'ada Ka caagan Daroogada

Isticmaalka Tubaakada, khamriga, iyo kiimikada waxaa looga mamnuucaa si adag aagga dugsiga. Tani waxaa ku jira dhammaan waxqabadyada kahor, inta lagu jiro, iyo kadib dugsiga dhammaan ardayda, walaalaha, waalidiinta, xubnaha kale ee qoyska iyo shaqaalaha.

### Boggaga Webka

Bogaga webkeena waxaa ka buuxa ilo badan oo wax ku ool ah iyo xogo xiiso leh. Waxaad ka geli kartaa kadib marka aad doorato "Boggaga Dugsiga" bogga internetka ee degmada eewww.flaschools.org

### Booqdayaasha

Dhammaan booqdayaasha soo galaya dhismaheena waa inay u sheegaan xafiiska weyn si ay u soo galaan, u sheegaan ujeedada booqashada, oo ay helaan calaamad lagu dhejinaayo oo ay tahay in si muuqata loogu xidho qaybta kore ee dharka.

Booqashooyinka dugsigeenu *waa inay* ahaadaan kuwo tacliin iyo ujeedo leh kale leh, sida marti ku hadlaya ama wax akhrinaya, waana in lala diyaariyaa macalinka fasalka kahor booqashada. Macalinka Fasalka wuxuu u sheegi doonaa shaqaalaha xafiiska jadwalka booqashada.

Mararka qaar, macaliintu waxay casuumi karaan xubnaha qoyska si ay oga qaybqaataan dabaaldegyada, xalfadaha, ama dhacdooyinka inta lagu jiro maalinta dugsiga. Inta lagu guda jiro marxaladaan, booqdayaasha waxaa wali laga doonayaa inay maraan xafiiska ayna helaan calaamad la siiyo.

---

# C

---

### Calaamadeynta Dharka iyo Agabyada

Sanad walba carruur badan ayaa dhumiya ama meel xun dhiga maqaalka dharka sida kabaha dhaadheer, koofiyadaha, iyo go'yaasha, iwm. Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad si joogto ah u calaamadiso maqaal kasta oo ah dharka banaanka, buug-yaraha, sanduuqyada qalin qoriga, iwm. si aad gacan oga geysato oggaanshaha mulkiilaha.

### Caymiska Shilka

Degmo Dugsiyeedka Madaxabanaan 831 ma bixiso caymiska caafimaadka dhaawacyada ka dhasha shilalka ee soo gaara ardayda gudaha dhulka dugsiga ama inta lagu jiro hawlaha uu dugsigu maalgeliyo. Kuwaan waxaa kujira dhaawacyo kasta oo shilal ee ka dhashay hawlaha waxbarashada jirka. Dhaawacyada noocaan ah waa in lagu daboolaa caymiska caafimaadka qoyskaaga ama siyaasad shaqsi oo aad siin lahayd ardaygaaga.

### Cuntada iyo Cabitaanada

Ardayda waxaa loo oggolaan doonaa inay haystaan dhalada biyaha si ay maalintii u cabbaan. Cilmi baaristu waxay muujisay in ardayda biyaha ku filan caba inay si fiican wax u bartaan. Haddii carruurtaadu doortaan inay haystaan dhalo biyo ah, waa inay xiran tahay biyo basna ku jiraan. Macalinka fasalka cunugaaga ayaa bixin doona macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan cuntooyinka fudud.

---

# D

---

### Daawada cayayaanka

Sida ku xusan qaanuunka Minnesota ee u baahan dugsiyadu inay ku wargeliyaan waalidiinta, dadka ardayda masuulka ka ah, iyo shaqaalaha wixii ku saabsan isticmaalka daawada cayayaanka qaarkood ee hantida dugsiga, waxaanu ku siinaynaa macluumaadka soo socda:

- Buufinta dhismaha: Arrintaan waxaa lagu sameeyaa oo kaliya aagga jikada ee dhismaha waxaana sameeya qof aqoon

ganacsi u leh. Jadwalka waqtiga waa hal maalin bishii. Jadwal gaar ah ayaa ku qoran faylka jikada.

- Buufinta Degdega ah: Si loo xakameeyo shinnida ama cayayaanka kale ee wax qaniina, waxaan u isticmaali doonaa cayayaanka sida loogu baahdo meelaha gaarka ah ee dhibaatada ka jirto sida agagaarka qashinka. Sidoo kale waxaan isticmaali karnaa waxyaabaha lagu soo dabo cayayaanka marka loo baahdo.
- Buufinta banaanka dhismaha: Bacriminta waxaa lagu sameeyaa garoonkeena kubadda qiyaastii hal mar sannadkii. Caadiyan waxaa la sameeyaa galabta jimcaha ama subaxda Sabtida. Marka la sameynaayo waxyaabaha xakameeya xashiishka, meelaha uu saameeyay waxaa dadka laga dhowraa muddo 24 kahor waxaana laga soo saaraa qoraal hordhac ah.

Sharciga gobolku sidoo kale wuxuu nooga baahan yahay in aanu ku wargelino inaan si buuxda loo fahmin saameynta caafimaad ee muddada dheer ee carruurta ee isticmaalka daawada cayayaanka ama nooca kiimikooyinka ay ka tirsan yihiin. Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah, fadlan la xariir xafiiska dugsiga.

## Dabaaldegyada Maalmaha Dhalashada iyo Dabaaldegyada Kale

Waxaan jecelnahay inaan u dabbaaldegno ardaydeena oo aan ka caawinno inay dareemaan inay yihiin kuwo khaas ah maalmaha dhalashadooda! Si loo taageero caafimaadka, badqabka iyo ka-qaybgalka loo siman yahay ee dhammaan ardayda, ma oggolin in macmacaan, cunto fudud ama cabbitaanno loogu keeno dugsiga si loogu dabbaaldego maalmaha dhalashada. Macallimiinteenu waxay maalinta dhalashada ilmo kasta ugu dabbaaldegi doonaan habab macno leh oo aan cunto ku lug lahayn. Dabaaldegyadan waxaa ka mid noqon kara in ilmaha si gaar ah loogu maamuuso fasalka, la siiyo shahaadada dhalashada, loo qaado hees ama loo sameeyo hawl kale oo da'diisa ku habboon si maalintaas looga dhigo mid xusuus gaar ah leh.

Si loo xaqiijiyo in dhammaan ardaydu dareemaan in laga qaybgeliyay, waxaan codsanaynaa inaan martiqaadyada xafladaha dhalashada loogu keenin dugsiga si loo qaybiyo, ilaa fasalka oo dhan la martiqaadayo mooyaane. Haddii ilmahaagu martiqaadayo dhowr arday oo ay isku fasal yihiin oo keliya, fadlan qabanqaabi in martiqaadyada lagu qaybiyo meel ka baxsan dugsiga adigoo adeegsanaya macluumaadka xiriirka gaarka ah ama habab kale. Waad ku mahadsan tihiin fahamkiinna iyo iskaashigiinna naga caawinaya inaan ilaalinno jawiga dugsiga ee wanaagsan oo qof walba ka qaybta ka yahay.

## Daryeelka Da'da Dugsiga - S.A.C./ Sonic

Daryeel da'da dugsiga (School Age Care, SAC) waxay siisaa xanaano-carruureedka gudaha dugsiga ee carruurta dhigta xanaanada ilaa fasalka 6 aad ee ISD #831. SAC waxay bixisaa waxqabadyo la kormeero oo kamid ah jawi xiiso leh, dhiirigelinaya.  Daryeelka waxaa la heli karaa iskuulka ka hor 6:00 subaxnimo iyo iskuulka kadib ilaa 6:00 galabnimo. Xannaano-maalmeedka waxaa sidoo kale la heli karaa maalmo badan oo aan dugsigu shaqeynayn (shirka waalidiinta, fasaxa jiilaalka iwm). Carruurtu waxay isku qori karaan waqti buuxa, maalin gelinkeed ama marar kaladuwan. Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Daryeelka Da'da Dugsiga ama Sonic, fadlan halkaan ka eeg webseedkooda.

## Dharka

Waxaan aaminsanahay in lebiska wanaagsan oo habboon uu gacan ka geysto dabeecadaha iyo dabeecadaha la jecel yahay. Dharka abuura walaac badqabka ama carqaladeeya hadafka dugsiga waa mamnuuc. Waalidiinta waxaa laga codsanayaa inay iska kaashadaan hubinta dharka ilmahooda maalin kasta si ay ugu hoggaansamaan tilmaamaha guud ee soo socda:

- Kabaha Kubada baskatka ayaa loo baahan yahay maalin kasta marka ay nasanayaan ayna kujiraan fasalka jiimka. Kabaha leh cirbaha lama oggola.
- Kabaha dhaadheer, gacmo gashiyada ama galoofyada, iyo koofiyadaha ayaa loo baahan yahay marka cimiladu xun tahay. Dugsiyadu waxay ardayda ku hayaan gudaha dugsiga haddii dabayshu qaboow tahay ama heerkulku ka qabow yahay -10ºF.
- Dharka ardayda waa in lagu calaamadiyaa si loo go'aamiyo lahaanshaha haddii ay dhacdo khasaare ama isku darka.

Intaa waxaa dheer, dharka ardayda waa inay u hogaansamaan tilmaamaha lagu xusay Siyaasada Gollaha Dugsiga #515 iyo Dhaqanka Xeerka Dugsiga Hoose ee dhigaya: Habka lebiska ama lebiska gaarka ah ee soo bandhigaya khatarta cad ee caafimaadka iyo badqabka ardayga, sababa ama suurtagal u ah inay keento faragelin shaqada, ama abuurta khalkhal fasalka ama dugsiga. Kuwa soo socdaa waa ka mamnuuc hantida dugsiga ama dhacdooyinka dugsigu maalgeliyo. Maamulayaasha dhismayaasha dugsiyadu waxay qaadan karaan heerar xadidan oo dheeraad ah. "Hantida Dugsiga" waxaa lagu qeexaa sida

dhismooyinka dugsiga, dhulalka, oo ay kujiraan meelaha baabuurta la dhigto iyo basaska dugsiga.

(1) Xirashada ama muujinta calanka isku dhafka, swastika iyo calamadaha KKK.
(2) Dharka muujiya ama kor u qaada:
- tubaakada, khamriga, daroogada, ama qoraalada iyo fariimaha xadgudubka ah, sawirada ama calaamadaha
- xadgudubka, luuqada af xumada ah ama sawirada
- muujiya galmo iyo/ama luuqado af xumo ah iyo/ama sawiro

(3) Dhar aan muujineen dhexda, barida iyo dharka hoos laga xirto.

Labiska ay degmadu ansixisay ee ciyaaraha dugsiga waxa laga yaabaa in laga reebo siyaasadaan. Labiska dabaasha ama xiisadaha biyaha ku saleysan ama hawlaha waa inay buuxiyaan shuruudaha ay dejiyeen dhismayaasha dugsiga.

### Dhibaataynta, Rabshadaha iyo Takoorka

Fadlan eeg Xeerka Gollaha Dugsiga 425 iyo Xeerka Guddiga Dugsiga 510. Forest Lake Area Schools kuma sameeyaan takoor lagu salaynayo jinsiga waxayna mamnuucaan takoorka jinsiga ee barnaamij kasta ama waxqabad kasta oo ay ka shaqeyso, sida uu u baahan yahay Title IX iyo xeerarkeeda, oo ay ku jiraan diiwaangelinta iyo shaqada. Degmadu Iskuulku waxay mamnuuceysaa nooc kasta oo dhibaateyn ama rabshado iyada oo lagu salaynayo Fasalka la Ilaaliyay. Qof kasta oo aaminsan in awoodooda shaqo ama waxbarasho ay daciiftay iyada oo ay ugu wacan tahay jebinta xeerarkan midkood waa inuu isla markiiba u sheegaa caabashada maamulaha dhismaha ama hogaamiyaha barnaamijka.

### Dhuminta iyo Helida

Haddii cunugaaga wax ku dhumiyay dugsiga, fadlan ku dhiirigeli inay eegaan qaybta waxyaabaha dhumay lana helay ee dugsiga. Haddii dharka uu ku qoran yahay magaca ilmaha iyo magaca ugu dambeeya waa ay fududahay in la helo. Alaabaha dhuma kadibna la helo waxaa caadiyan loogu tabarucaa ururo samafal dhowr jeer sanadkii - gaar ahaan xiliga qaboobaha iyo kadib gu'a.

---

# F

---

### Fasaxyada

Waxaan ku dhiiri galinaynaa qoysaska inay helaan habab ammaan ah oo ay ku wada dabaaldegaan ciidaha. Inta lagu jiro saacadaha iskuulka, waxaan u qabanaynaa xafladaheena dhacdooyinka iyo munaasabadaha si dhow ula xiriira barashada iyo howlaha dugsiga, mana qabaneyno wax xaflado fasax ah oo gaar ah oo dugsiga ah.

### Filashooyinka Darawalka Baska

Mudnaanta raacitaanka baska dugsigu wuxuu u baahan yahay habdhaqan habboon. Darawal baska oo kasta wuxuu masuul ka yahay badqabka gaadiidka ardayda ee baskiisa/baskeeda. Ardaydu waa inay baska loogu talagalay u raacaan looga soo qaado dugsiga maalin kasta waana inay raacaan filashooyinkaan:

- Imoow goobtaada ugu yaraan shan daqiiqo kahor
- Ka fogoow aagga khatarta ah
- Raac tilmaamaha darawalka. Darawalka baska wuxuu oggolaansho u haystaa inuu bixiyo kuraasta.
- Mar walba fadhi adoo gacmaha isa saaraya, horey fiiri, oo wadada dhexe ha xirin
- Gacmaha, madaxa, iwm haka dhex bixin baska
- Noqo qof akhlaaq leh—ha ku hadlin erayo xun
- Wax cunista iyo wax cabistu waa mamnuuc
- Daadinta iyo wax tuurista lama oggola

Ku xadgudubka wax kasta oo kamid ah sharciyada waa in darawalka baska uu usoo gudbiyo maamulaha.

Xadgudubka 1[aad]: Diigniin

Xadgudubka 2aad: Digniin ama 1-3 jeer ayaa lagaa ganaaxayaa inaad raacdo baska
Xadgudubka 3aad: 5 jeer ayaa lagaa ganaaxayaa inaad raacdo baska
Xadgudubka 4aad: 10 jeer ayaa lagaa ganaaxayaa inaad raacdo baska / kulanka qoyska
Xadgudubyada dheeraadka ah: si shaqsi ah ayaa loo eegayaa. Waxaa laga yaabaa in ardayda la ganaaxo muddo dheer, oo ay kujiraan inta sanadka ka hartay.

Anshaxa kale: Ayadoo la eegaayo heerka anshaxa ardayga, waxaa laga yaabaa in cawaaqiib xumo dheeraad ah la duldhigo waqti kasta. Darawalka baska dugsigu waa inuu awood u leeyahay inuu ardayga ka saaro baska hal maalin haddii uu sameeyo akhlaaq xumo marka uu galabtii u kaxeynaayo guriga haddii loo arko inay keenayso khatar degdeg ah oo la taaban karo ama saameyn karta dadka ku xeeran ama hantida, waase haddii darawalku raaco xeerarka maamulka ee ka hadlaya ganaaxaan. Darawalku waa inuu xiriir toos ah la sameeyo waalidka/masuulka kahor dhamaadka fiidkii maalinta ka horeysa ka ganaaxista ardayda baska.

Haddii arday uu gafo baska u socda guriga, waxaa la wici doonaa qoyskooda waxaana laga codsan doonaa inay keenaan gaari guriga geeya. Fadlan eeg Siyaasada Gollaha Dugsiga #531 si aad u hesho xog dheeraad ah.

---

# G

---

## Gaadiidka

Dhammaan qoysasku waa inay "iska qoraan" si ay u helaan gaadiidka dugsiga ilmaha geeya kana soo qaada. Arrintaan waxaa la sameyn karaa waqti kasta inta lagu jiro kalaandarka dugsiga fadlan eeg webseedka gaadiidka dugsiga si aad u hesho foomamka iyo xog dheeraad ah.

## Gaari ka degista

Gaari ka degista waxay bilaaban doontaa 9:00 subaxnimo dugsiguna wuxuu bilaaban doonaa qiyaas ahaan 9:15 subaxnimo. Xubnaha qoyska looma oggolaan doono inay u galbiyaan ardaygooda fasalka, waxaanu haynaa shaqaale diyaar u ah inay caawiyaan dhammaan ardaydeena subaxdii. Fadlan ha fasixin ardaygaaga kahor 9:00 subaxnimo, maadaama aanay jirin wax kormeer ah oo la heli karo.

## Gollaha Waxbarashada

Dadka soo socda ayaa hadda xubno ka ah Guddiga Dugsiyada Forest Lake Area Schools:
Tessa Antonson
Jill Christenson
Julie Corcoran
Mark Kasel
Curt Rebelein, Junior
Gail Theisen

Doorashada guddiga dugsiga ayaa loo qorsheeyay Noofambar 3, 2026. Macluumaadka ugu dambeeyay ee guddiga dugsiga iyo liiska xubnaha guddiga oo ay la socdaan macluumaadkooda xogta xiriirka ayaa laga heli karaa barta interneetka ee flaschools.org/board.

## Guri la'aan/ Ardayda ay haysato Guri la'aanta

Fadlan eeg webseedka adeegyada Taageerada Qoyska ee Degmada.

---

# H

## Habraaca Cabashada Anshaxa

Ardayda, waalidiinta iyo dadka ardayda masuulka ka ah, iyo shaqaalaha dugsigu waxay gudbin karaan cabasho si ay u raadiyaan tallaabo sixid ah marka shuruudaha sharciga ka saarida cadaalada ardayda Minnesota, oo ay kujiraan hirgelinta habdhaqanka deegaanka iyo siyaasadaha anshaxa, aan loo fulin si habboon ama aan si takoor ah loo fulin.

Xeerka Anshaxa Ardayga Dugsiga Hoose waxa kujira qaybo waaweyn oo kamid ah siyaasada degmada ee anshaxa, iyo guud ahaan Siyaasada Anshaxa Gollaha Dugsiga #515. Sidoo kale waxaad nuqul ka codsan kartaa xafiiska dugsiga.

## Hanjabaadaha

Macalin fasal oo kasta wuxuu keenaa qaab gaar ah oo loo dabaaldego laguna aqoonsado ardayda. Waxaan ka codsanaynaa in qoysasku aysan keenin cunto ama alaab kale si ay iskugu dhaafiyaan maalmaha dhalashada ama dabaaldegyada kale.

# I

## Iimayl/ Imaylada Ardayga

Laga bilaabo Julaay 2024, dhammaan ardayda fasalada Kindergarten ilaa fasalka sideedaad (K-8) waxay awoodi doonaan oo kaliya inay kula xidhiidhaan iimaylo xaddidan oo la oogol yahay. Dhammaan kuwa kale ee soo dirayaasha iyo helayaasha ah waa la xannibi doonaa. Wax ka beddelkan ee laga beddelay liiska xaddidan (default allow all) oo loo beddelay liis oggolaanshaha adag (default block all) wuu ka duwan yahay wixii ay degmadu hore u samaysay. Soo-diraha aan la oggolayn waxa uu heli doonaa iimaylka soo laabashada oo sheegaya in aan la diri karin iimaylka. Tixraac dokumiintigan wixii macluumaad dheeraad ah.

## Imaanshaha

Basasku waxay yimaadaan 9:00 a.m. ama wax yar kadib. Ardayda aan ku iman baska waa inaanay dugsiga iman ka hor 9:00 subaxnimo. Macalimiinta caadiyan waxay kujiraan kulanada waalidka ama kooxda kahor 9:00 a.m., mana jiro wax kormeeraya ardayda waqtigaas kahor. Xubnaha qoysku looma oggolaan **doono** inay ardaygooda u sii raacaan fasalka. Waxaan haynaa shaqaale diyaar u ah inay dhammaan ardaydeena ka caawiyaan inay subaxdii tagaan fasaladooda. Ardayda imaanaya wixii ka dambeeya 9:15 a.m. waa inaysan soo maraan xaafiiska kahor inta aysan aadin fasalka. Waxbarashada fasalku waxay bilaabataa 9:15a.m. subaxnimo. Saacadaha dugsiga waa 9:15 a.m. subaxnimo illaa 3:40 p.m. galabnimo.

## Isdiiwaangelinta

Qoysasku waxay ka diwaangelin karaan carruurtooda xafiiska dugsiga waqti kasta. Diiwaangelinta dugsi kasta oo ka tirsan agagaarka Lake Forest waxa kale oo lagu sameyn karaa oonleen halkaan. Saacadaha xafiiska waxay ka bilaabanayaan 7:45 - 4:15 galabnimo.

## Isticmaalka Interneetka

Tilmaanta iyo hagidda isticmaalka interneetka ee la aqbali karo waxaa dhammaan ardayda siin doona khabiirka warbaahinta iyo macallimiinta fasalkooda.

Interneetku waa qalab waxbarasho ardayduna waxay u isticmaali doonaan inay helaan agab tixraac oo oonleen ah sida encyclopedias, atlases, joornaalada, iyo goobaha waxbarashada si ay u dhameystiraan hawsha. Isticmaalka aan habboonayn ee interneetka wuxuu keeni karaa in la hakiyo mudnaanta kombayuutarka iyo/ama tallaabo anshaxeed oo kale.

Tilmaamaha isticmaalka guriga ee interneetka

- Kormeerida hawlaha interneetka

- Qeexida badqabka interneetka, sida bixin la'aanta xogta gaarka ah
- Muraajaceynbta anshaxa kumbuyuutarka sida siin libin qoraha
- Qeexida xogta laga helo interneerka waxay noqon kartaa mid takoor ah ama aan saxneyn

### Ixtiraamka Diinta
Fadlan u sheeg macalinka ilmahaaga (carruurta) baahi kasta oo ay qabaan. Si aad u hesho macluumaad dheeri ah eeg Siyaasada Gollaha Dugsiga 603.

---

# K

---

### Kaararka Buundooyinka Ardayda
Kaararka Buundooyinka Ardayda waxaa laga heli karaa oonleenka gaar ahaan barta ParentVUE dhammaadka simistar kasta. Shirarka Waalidka-macalimka waxaa la qabtaa dayrta iyo gu'a.

### Kahortaga iyo Soo Sheegida Dandaansiga
Ka degmo dugsiyeed ahaan, waxaan xoogga saarnaa dhisidda xiriirro adag oo wanaagsan oo aan la yeelanno ardayda, shaqaalaha iyo qoysaska.  Annagoo adeegsanayna barnaamijyada, fursadaha ardayda, manhajka iyo xiriir cad, waxaan ka shaqaynaa kobcinta xiriirrada iyo muujinta in xiriirradu yihiin kuwo muhiim ah oo awood leh.

Xirfadaha bulshada waxaa lagu bartaa manhajka waxbarashada bulshada ee SEL ee dhammaan dhismayaasha.  Sidoo kale, dhammaan dhismayaashu waxay hirgeliyaan xeeladaha PBIS (Taageerada iyo Waxqabadka Dhaqanka Wanaagsan) oo ah tallaabo kahortag.  Fadlan eeg Siyaasada Gollaha Dugsiga #541 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.  Foomka ka warbixinta dandaansiga degmada waxaa laga heli karaa halkaan iyo webseedka degmada.

### Kalaandarada
Kalaandarka degmada
Kalandarka Qoyska ee La Daabacan Karo ee 2026–2027
Jadwalka Kulanka Gollaha Dugsiga

### Khabiirada
Degmo dugsiyeedkeena waxay leedahay shaqaale takhasus leh oo ah macalimiin shati haysta kuwaas oo bixiya adeegyo ka baxsan kuwa lagu helo fasalka caadiga ah ee fasalada K-6.  Dhammaan ardaydu waxay yeelan doonaan fasal si joogto ah loo qorsheeyey oo leh takhasus kasta oo hoos ku qoran.

- *Macalinka Muusikada*
- *Macalinka Waxbarashada Jirka*
- *Macalinka Fanka/ Hal abuurka/ Warbaahinta*

---

# L

---

### Lacagta loo Diro Dugsiga
Laguma taliyo in ardayda lacag keenaan dugsiga haddii aysan muhiim ahayn. Lacagta loo keeno sababaha dugsigu fasaxay waa in lagu soo diraa baqshad xiran oo si cad ugu qoran tahay magaca ardayga. Fadlan isticmaal jeegaga, oo ku hag ururada saxda ah. Haddii jeegag nalooga soo celiyo bangigaaga lacag la'aanta daraadeed (NSF, Akoonka Xiran, iwm.), waxaan xaq u leenahay inaan codsano kaliya lacag caddaan ah marka aan rabno kharashyada mustaqbalka.

## La-taliyaha

Mid kasta oo kamid ah dugsiyadeena hoose wuxuu leeyahay la-taliye waqti buuxa ah iyo/ama shaqaale bulsho kaas oo bixin doona adeegyo kala duwan. Ardeydu waxay taageero ku heli karaan bandhigyo fasalka lagu qabto, ka qayb qaadashada koox yar, ama shirar gaar ah oo marar la qabto. Ujeedada ugu wayni waa, si kastaba ha ahaatee, inaad ka mid noqoto kooxda ka dhigi karta dugsiga waaya aragnimo guul leh dhammaan ardayda.

## Liiska Sahayda Dugsiga

Liiska sahayda dugsiga waxa laga heli karaa webseedyada dugsiyadeena laga bilaabo bisha Ogoosto kahor billoowga sannad dugsiyeedka cusub. Liiska sahayda dugsiga waxaa sidoo kale laga heli karaa Walmart iyo Target kuyaala deegaankeena.

---

# M

---

## Maalinta Sawirka

Sawirrada dugsiga waxaa la qaadi doonaa bilowga sannad-dugsiyeedka iyo mar kale xilliga gu'ga (ikhtiyaari). Macluumaad dheeraad ah ayaa loo soo diri doonaa guriga dhowr maalmood kahor marka sawirka la qaadaayo.

## Maareynta Dhibaatada

Siyaasada Gollaha Dugsiga #538 waxaa la abuuray iyadoo lala tashanaayo tilmaamaha gobolka iyo wakaaladaha wax ka qabashada bulshada deegaanka iyo shaqsiyaadka iyo kooxaha kale ee ku habboon ee laga yaabo inay ku lug yeeshaan gacan ka geysashada xaalada degdega ah ee dugsiga. Siyaasada Maareynta Dhibaatada waxaa kamid ah nidaamyada guud ee xasaradaha ee lagu sugi karo dhismaha, ka bixista fasalka, ka bixista dhismaha, ka bixista xerada, iyo hooyga. Sharciga gobolku wuxuu u baahan yahay ugu yaraan shan qaab oo badqab dugsi ah, shan gaari dab-demis ah, iyo hal tornado sannadkii.  Isgaarsiinta qoraalka ah waxaa loo diri doonaa qoysaska ka hor daloolin. Qoysaska waxaa loo ogol yahay inay ardayda ka saaraan jimicsiyada iyagoo warbixin qoraal ah u diraya dugsiga kahor taariikhda jimicsiga.

Haddii xaaladuhu kasoo baxaan mid kamid ah dhismayaasha dugsiyadeena, dhammaan dugsiyadeenu waxay isticmaalaan nidaam hab-maamuus ah oo ka yimid Ururka Waan idin jeclahay *I love u guys Foundation* si loo hubiyo in shaqaalaheena iyo ardaydeena ay ogaadaan nooca xaalada degdega ah ee dhacaysa iyo sida looga jawaabo. Isticmaalka hab maamuusyadaan waxaa iskaashi la leh sharci fulinta deegaanka iyo/ama xafiiska degmada ee Booliska waxaana loogu talagalay in lagu caddeeyo macluumaadka degdegga ah ee shaqaalaha, ardayda, iyo qoysaska. Haddii xiriirada degdega ah la diro inta lagu jiro sanad dugsiyeedka, waxaanu tixraaci doonaa qaybahaan jawaab celinta waxaanu bixin doonaa macluumaadka ku saabsan xaalada. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan hab-maamuuska Jawaabta Caadiga ah ee *I love u guys Foundation*, gujihalkaan.




## Macluumaadka cimilada

Eeg Xiritaanka Dugsiyada *Degdegga ah.*

## Manhajka

Waxaan bixinaa manhaj isku dheeli tiran oo ay diyaariyeen oo ay si joogto ah u eegaan kooxaha macalimiinta. Aagga mawduuca oo ay kujiraan akhriska, xisaabta, waxbarashada bulshada, sayniska, caafimaadka, waxbarashada jirka, farshaxanka, muusikada, warbaahinta, iyo teknoolajiyada. Manhajka iyo farsamooyinka wax barida ayaa inta badan wax laga badelaa si loo daboolo baahiyaha gaarka ah. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah fadlan booqo webseedka manhajkeena.

## Meelaynta Fasalka

Shaqaalaheenu waxay ku bixiyaan waqti aad u badan si ay ardayda ugu meeleeyaan kooxaha fasalka sannad dugsiyeedka soo socda. Hadafkeena koowaad waa inaan dhisno fasallo wax soo saar leh, oo kala duwan oo ilmo kasta la siin karo fursad uu ku guuleysto oo loola tartamo. Sameynta arrintaan waxaa la tixgeliyaa dhowr arrimo:

- Habka waxbarashada ardayga
- Tixgelinta dhammaan arrimaha tacliinta iyo bulshada
- Kooxaha kala duwan: isku dheelli tirka qowmiyada, jinsiga, guusha tacliinta, qaababka waxbarashada, heerarka waxbarashada, iyo walaacyada anshaxa
- Ka fogaanshaha dhibaatooyinka shaqsi ahaaneed ee suurtagalka ah
- Cabbirka fasalada siman
- Tallooyinka macalinka sanadkaan
- Fikrada waalidka ee la xiriirta habka waxbarashada, qaabka waxbarida, iyo walaaca waxbarashada. Warqadaha ay waalidiintu ku soo gudbinayaan ra'yigooda waa in la soo gudbiyaa ugu dambayn ***dhammaadka Abriil.***

## Mutadawiciinta

Haddii aad xiiseyneyso inaad si ikhtiyaar oga shaqeyso dugsiga, fadlan u sheeg macalinka cunugaaga. Mutadawiciinta qabta hawlaha kaambaaska iyo hawlaha habbeenkii waxaa loo yaqaan "Mutadawiciinta adeegyada", waana inay ka gudbaan eegida taariikhda dambiyada sida ku xusan Siyaasada Gollaha Dugsiga #438.

Waxaan qiimeynaa iskaashiga adag ee ka dhexeeya guriga, dugsiga iyo bulshada. Waxaan ku dhiirrigelinaynaa waalidiinta iyo mas'uuliyiinta inay ka qaybqaataan siyaabo kor u qaadaya waayo-aragnimada waxbarasho ee dhammaan ardayda.

Haddii aad danaynayso inaad qaab mutadawacnimo ah ku shaqayso ama aad ka caawiso fasalka ilmahaaga, tallaabada ugu horreysa waa inaad la xiriirto macallinka fasalka ilmahaaga. Macallimiintu ayaa ah dadka sida ugu habboon u garan kara fursadaha ka jira gudaha iyo dibadda fasalka ee waafaqsan baahiyaha fasalka, taageerana waxbarashada ardayda. Innagoo wadajirna, waxaan abuuri karnaa fursado macno leh oo qoysasku kaga qaybqaataan, kuwaas oo saamayn wanaagsan ku yeesha bulshada dugsigeenna.

Si loo xaqiijiyo jawi waxbarasho oo ammaan ah, sugan oo wax-ku-ool ah oo ay helaan dhammaan ardayda iyo shaqaaluhu, dhammaan booqdayaashu waa inay marka ay yimaadaan iska xaadiriyaan xafiiska weyn oo ay oggolaansho ka helaan maamulka dhismaha ka hor intaanay gelin dugsiga ama ka qaybqaadan hawlaha dugsiga. Inta lagu jiro maalinta dugsiga, waxbarashada iyo badbaadada ardayda iyo ilaalinta hannaanka barnaamijyadeenna waxbarasho ayaa ah mudnaantayada ugu sarreysa. Maamulka dhismaha ayaa go'aamin kara inuu xaddido ama jadwaleeyo gelitaanka booqdayaasha si loo yareeyo carqaladaha loona ilaaliyo jawi waxbarasho oo wanaagsan. Macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa Siyaasadda Guddiga Dugsiga #704.

## Mutadawiciinta Taageerada Dheeraadka ah bixiya

"Mutadawiciinta Taageerada Dheeraadka ah bixiya" waa erey loo adeegsado in lagu qeexo qof kormeera ama la socda ardayda hawlaha ka baxsan dhulka dugsiga ama kuwa habeenka la seexdo. Mutadawiciintaan waa inay ka gudbaan oo aysan lahayn taariikh dembi sida ku xusan Siyaasada Gollaha Dugsiga #438. Haddii aad jeclaan lahayd inaad dhammaystirto hubinta asalka ah, fadlan buuxi foomkan, oo ku lifaaq lacagta loo qoondeeyay, kadibna u soo celi xafiiska dugsiga.

# N

## Nasashada

Ardaydu waxay maalin walba heli doonaan waqti ay banaanka ku nastaan *ilaa in*:

- Cimiladu ama dabeyshu tahay - 10 digrii ama kasii qaboow
- Uu roob da'aayo maahee iyo/ama aagga uu ka yeeraayo unkod
- Waxaa jira xaalado cimilo oo kale oo banaanka ka dhigaaya badqab la'aan
- Qoraal kasoo baxay qoyskooda oo ku saabsan xanuun ama dhaawac cunug ayaa la siinayaa macalinka
    - Haddii ilmahaagu u baahdo inuu seego fasaxa xanuun ama dhaawac ka badan hal maalin, waa inaad na siisaa qoraal dhakhtar oo qeexaya sababta xanuunka ama dhaawaca ay tahay inay uga cudur daaraan fasaxa dibadda

# P

## ParentVUE

ParentVUE ee Synergy waa nidaamka macluumaadka ardaydeena oo taageera tirada ardayda, jadwalka, imaanshaha, kaararka warbixinta, buundooyinka iyo waxyaabo kale oo badan.

## PTO (Ururka Waalidka Macalinka)/ PTA (Ururka Waalidka Macalinka)

The PTO/PTA wuxuu ka kooban yahay waalidiinta, macalimiinta, iyo shaqaalaha dhammaan sida mutadawacnimada ah iskula shaqeynaaya. Waxay u adeegaan oo ay bixiyaan taageero dugsigeena meelo badan ka helo: iskudubarid iskaa wax u qabso ah, martigelin, lacag ururin, iyo barnaamijyo/dhacdooyin kobcin. Dhammaan lacagaha kasoo xorooda lacag uruurinta waxay si toos ah ugu noqdaan dugsiga qaab sahay aasaasi ah, kobcin, deeqaha waxbarasho ee bannaanka, iyo qalabka dugsiga.

Ilaha PTO/PTA waa shaqaalaha iyo mutadawiciin waalid ah oo madaxbanaan. Iskaa wax u qabsashada dugsigeena waxay noqon kartaa waayo-aragnimo aad u faa'iido badan, waxaana jira fursado badan. PTO/PTA waxay kulmaan hal mar bishii waqtiyadana waxaa lagu qoray wargeysyada billaha ah ee lagu qoro wixii cusub.

# Q

## Qaadida ardayda

Xiritaanka dugsiga wuxuu billoowdaa 3:40galabnimo.  Fadlan samee dadaal kasta si aad u joogo dugsiga xiliga la fasaxaayo ardayda maalinta.  Qoysaska looma oggolaan doono dhismaha dugsiga inta lagu jiro xiliga galabkii ardayda la fasaxaayo.  Fadlan eeg xiriirka maamulaha dugsigaaga ee ku saabsan habraacyada qaadista ardayda ee waalidka.

## Qado

Carruurtu waxay helaan fursad ay ku cunaan qado kulul, wax u dhigma qado, ama inay boorso qado kujirto guriga kasoo qaataan. Cabitaanada sonkorta leh, cabitaanada tamarta laga helo ama dhalooyin galaas ah lama oggola. Meenuga billaha ah ayaa laga heli doonaa webseedka nafaqada ee degmada.

## Qarsoonaanta Xogta

Sharciga qarsoonaanta xogta wuxuu naga mamnuucayaa inaan shaacino lambarka guriga ama ciwaanka arday kasta ama xubin shaqaalaha kamid ah ayadoon oggolaansho loo haysan inta badan xaaladaha.

## Quraac

Degmadeenu waxay siisaa ardayda quraac billoowga maalin dugsiyeed kasta. Sharcigaan ayaa bixinaya quraacda iyo qadada si bilaash ah ardayda ka hela cuntada dugsigooda. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Barnaamijka Cuntada

Bilaashka ah guji halkaan.

# S

## Safarada Goobta
Ka qaybqaadashada safarada goobta waa mudnaan. Ardaydu waxay u baahan yihiin inay meel wanaagsan joogaan marka la eego akhlaaqda iyo shaqooyinka loo diro si ay xaq ugu yeeshaan inay xaadiraan dugsiga. Waxaa la isticmaali doonaa basas si ay u qaadaan ardayda. Safarka goobta waxaa la sameyn dooonaa inta lagu jiro maalinta dugsiga waaana qayb ka mid ah manhajka.

## Shaqada Guriga
Shaqada guriga, marka lagu xiro yoolalka waxbarashada, hadafyada iyo ujeedooyinka ku aadan waxa ardaydu hadda fasalka ku baranayaan, waa qayb muhiim ah oo kamid ah waxbarashada ilmahaaga. Shaqada guriga waxay kor u qaadaa awooda ardayga ee ku aadan gaarista heerka aqoobta ee laga filaayo iyo xirfadaha ku habboon heerka waxbarashada ardayga.

Akhrisku iyo qoraalku waa aasaaska guusha dhammaan ardayda. Dhammaan ardaydu waa inay ka qaybqaataan akhriska maalinlaha ah ee madaxbanaan.

Layliyada Fasalka ee aan La dhammeeyn: Waxaa jiri kara waqtiyo uusan ardaygu dhamaystirin qayb ka mid ah shaqada fasalka dhexdiisa ama mashruuca. Markay arrintaasi dhacdo ardaydu waxay u baahnaan karaan inay dhameystiraan hawsha guriga si ay ula socdaan hawsha maalinta xiggta iyo ujeedooyinka waxbarashada.

## Shiishada iyo Tubaakada
Isticmaalka waxyaabaha leh tubaakada oo ay kamid yihiin aalada shiishada la dhuuqo waa ka mamnuuc dhammaan dhismooyinka dugsiga iyo hantida dugsiga. Si aad u hesho macluumaad dheeri ah fadlan eeg Siyaasada Gobalka Dugsiga 427.

## Siyaasada Hubka
Fadlan eeg lifaaqaan,Siyaasada Gollaha Dugsiga #532 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

# T

## Talaalka
Xeerka Minnesota ee Qaybta 121A .15, wuxuu dhigayaa in dhammaan carruurta ku jirta dugsiyada Minnesota laga tallaalo gawracatada, teetanada, xiiq dheerta, dabaysha, jadeecada, qaamo qashiirta, iyo jadeecada rubella, (iyo cagaarshoow B ee xannaanooyinka soo galaya) taas oo u oggolaanaysa wax ka reeban. Diiwaanka tallaalka waxaa lagu hayn doonaa faylka arday kasta sida uu sharcigu dhigaayo. Eeg Siyaasada Gollaha Dugsiga #525 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

## Taleefonada gacanta, Tignoolajiyada Gaarka ah, iyo Waxyaaba Muhiimka ah-
Waxaan si adag ugu talinaynaa in ardaydu **aysan** keenin dugsiga taleefonnada gacanta, saacadaha smaatka, iyo tignoolajiyada kale. Haddii ilmuhu haysto mid ka mid ah alaabtan, waa inay ku jirtaa boorsadooda dhabarka oo ay demiyaan, sababtoo ah waxay carqalad ku yihiin waxbarashada. Haa, tan waxaa ku jira saacadaha casriga ah. Haddii ilmuhu uu leeyahay Qorshe Daryeel Caafimaad oo Degdeg ah oo la cusboonaysiiyay taas oo ay ku jirto tignoolajiyada, waxaanu taageeri doonaa qorshahooda daryeelka. Haddii xubin ka mid ah shaqaaluhu uu arko taleefonka gacanta ama qalabka kale ee tignoolajiyada gaarka ah, waxaa lagu hayn doonaa xafiiska maamulaha, qoysaska waa lala xiriiri doonaa, waxayna u baahan doonaan inay soo qaataan. Xusuusin ahaan, mas'uul kama nihin alaabta lunta ama la xado.

### Teknoolajiyada
Fadlan macluumaadka oo dhammaystiran ka eeg [Siyaasada Guddiga Dugsiga #524]. Qoys kasta oo fasalka 5aad iyo 6aad ilmo u dhigtaan waxaa la waydiin doonaa inay saxiixaan [Heshiiska Amaahda Chromebook ee FLAS] billoowga sannad dugsiyeedka marka tiknoolajiyada dugsigu soo saaro lagu meeleeyo. Ardayda xanaanada ilaa fasalka 5aad waxay isticmaali doonaan tikniyoolajiyadda markii ay habboon tahay waxayna mas'uul ka noqon doonaan daryeelka qalab kasta iyo qoysaska ayaa mas'uul ka noqon doona waxyeello/lumis kasta oo qalabka dugsiga la siiyay.

Liiskaan soo socda waxa loo isticmaali karaa hage ahaan marka la eegaayo kharashyada dayactirka buug yaraha Chromebook-ka. Kharashaad sax ah ayaa imaan kara:

- Badelka shaashada - $50
- Badelka kiiboodka - $75
- Waxyeelada/khasaaraha jaajarka - $30
- Chromebook dhuma - $230
- Kharashka nafiifinta (haddii aalada dib loo soo celiyo una baahan yahay nadiifin) - $30

Sidookale eeg "Taleefonada gacanta, Tignoolajiyada Gaarka ah, iyo Waxyaaba Muhiimka ah" ee sare.

### Tijaabada
ISD #831 waxay isticmaashaa labo tijaabo oo kaladuwan oo ku aadan dugsiyada dhexe. Qiimeynta Buundada FAST waxa la siiyaa ardayda fasalada 1-6 aad si loo cabbiro koboca tacliimeed ee ardayga ee dhinacyada akhriska iyo xisaabta ku aadan. Qiimeynada gobolka (MCA's) waxa loo isticmaalaa fasalada 3-6 aad si loo cabbiro horumarka sannadlaha ah ee ku filan (AYP) kuna aadan akhriska iyo xisaabta. Haddii sabab kasta ha jirtee waalidku aanu doonayn in ilmahooda la baaro waxay u baahan doonaan inay buuxiyaan foomka Diidmada. Su'aalaha ku saabsan barnaamijka tijaabada degmada waxaa lagu hagaajin karaa maamulaha dugsiga. [Isticmaal] [lifaaqaan] si aad u eegto Kalaandarka Qiimeynta FLAS.

Xeerarka Minnesota, qaybta 120B.31, qayb hoosaadka 4a, waxay u baahan tahay Waaxda Waxbarashada ee Minnesota (MDE) inay daabacdo foom waalidiinta/mas'uuliyiinta si ay u buuxiyaan haddii ay diidaan in ardaygoodu ka qaybqaato qiimaynaha heerka sare ah ee gobolku u baahan yahay. Waxa kujira qaar kamid ah macluumaadka aasaasiga ah si looga caawiyo waalidiinta/masuuliyiinta inay gaaraan go'aamo xog ogaal ah oo u anfacaya ilmahooda iyo dugsigooda iyo bulshada. Foomka lagu buuxinaayo shuruudaha sharcic dejinta waxaa laga heli karaa lifaaqa hoose. Marka la dhammeeyo, waa in lagu soo celiyaa degmada ardaygaaga. Degmada ardaygu waxay u baahan kartaa macluumaad dheeraad ah.
https://resources.finalsite.net/images/v1678707170/flaschoolsorg/pjcpiok9pbbardbrzmpb/ParentGuardianGuideandRefusalforStudentParticipationinStatewideTesting.pdfHagaha Waalidka/Masuulka iyo Diidmada ka qaybgalka Ardayga ee Imtixaanka Gobolka oo dhan

---

# W

---

### Waxbarashada Bulshada
Dugsiga Degmada Forest Lake wuxuu bixiyaa nashaadaadyo badan oo kaladuwan waqtiga dugsiga kadib iyo fiidkii si loo kobciyo, madadaalada, dhaqanka, bulshada iyo ujeedooyinka waxbarashada. Hadafka ugu muhiimsan ee Waxbarashada Bulshada waa: in la siiyo fursadaha waxbarasho ee nolosha oo dhan xubnaha bulshada ee da' kasta leh, in la taageero lana kordhiyo barnaamijka K-12, iyo in gacan laga geysto dhisidda bulshooyin xooggan oo awood u siinaya qof kasta inuu gaaro awoodiisa ugu weyn. Si aad u hesho xog dheeraad ah, fadlan booqo [webseedka] Waxbarashada Bulshada.

### Waxbarashada Dareenka Bulshada

Degmo dugsiyeedkeena waxay qaadatay Talaabada Labaad® si ay u bixiso taageerada (SEL) ee ay helaan dhamaan ardayda dhigata dugsiyada hoose si todobaadle ah ayna ku helaan gudaha fasaladooda. Barnaamijka SEL ee hormuudka ka ah dugsiyada hoose ee Maraykanka, Talaabada Labaad ee Elementary® waa cilmi-baaris ku saleysan. Si aad wax oga barato xogtaan, booqo www.secondstep.org.

### Waxbarashada Gaarka ah

Dugsiyada Aagga Forest Lake waxaa ka go'an inay fuliyaan waajibaadka Shaqsiyaadka Naafada ah Sharciga Waxbarashada (IDEA) iyo Qaybta 504 ee Sharciga Dhaqancelinta. Mabaadi'da aasaasiga ah ee ka dambeysa sharciyada federaalka waa in ardayda naafada ah la siiyo waxbarasho dadweyne oo bilaash ah oo ku habboon jawiga ugu xadidan. Tani waxay ka dhigan tahay in degmadu leedahay nidaamyo lagu aqoonsado, lagu qiimeeyo oo lagu bixiyo adeegyada waxbarashada ardayda naafada ah si la mid ah kuwa dhiggooda ah ee aan naafada ahayn sida loo arko inay habboon tahay. Waalidiinta iyo ardaydu waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan qiimeyn haddii ay ka shakiyaan inuu ardaygu leeyahay naafo saameynaysa horumarkiisa waxbarasho. Degmadu waxay shaqaaleysiisaa macalimiin ruqsad haysta oo waxbarashada gaarka ah qaabilsan, daaweeyayaasha iyo cilmi-nafsiga si ay u sameeyaan qiimaynta.

Waalidiinta iyo ardaydu waxay xaq u leeyihiin inay qayb ka noqdaan kooxda waxbarashada ee go'aamisa hababka qiimeynta, tarjumaadda natiijooyinka qiimaynta, iyo horumarinta Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi ahaaneed (IEP) ama Qorshaha 504 haddii loo baahdo. Waalidiinta iyo ardayda qaba su'aalo ku saabsan nidaamka waxay la xiriiri karaan Agaasimaha Waxbarashada Gaarka ah ayagoo ka wacaaya lambarka 651-982-8129.

### Waxyaabaha ardaydu leeyihiin ee dugsiga

Fadlan ha u oggolaan ilmahaaga inuu dugsiga keeno waxyaabo aan loo baahnayn, sida alaabta lagu ciyaaro, kaararka ganacsiga, ama qalabka elektarooniga ah (ilaa uu ogolaado macalinka fasalka maahee). Dugsigu masuul kama noqon doono alaabahaan haddii waxyeelo gaarto ama dhumaan. Ardayda dugsiga keena alaabo noocaas ah waxaa laga codsan doonaa inay xafiiska oga tagaan. Waxaa lala xariiri doonaa waalidiinta waxaana laga codsan doonaa inay qaadaan marka ay macquulka tahay.

## X

### Xaadirista iyo Maqnaanshaha

Xaadirista joogtada ah waxay lama huraan u tahay horumarka wanaagsan ee dugsiga. Waxaan la soconaa imaanshaha maalin kasta si aan u xaqiijino goorta iyo **sababta** ay carruurtu u maqan yihiin. Ardayga waxaa looga baahan yahay sida uu qabo sharcigu inuu dugsiga imaado. Haddii aysan dugsiga imaan maalin ama qayb kamid ah maalinta, sababo sharci dartood, waalidka ama masuulka waa inay ogeysiiyaan dugsiga. Waalidka ama qofka ilmaha masuulka ka ah ayaa dalban kara maqnaansho cudurdaar leh laakiin maamulka dugsigu wuxuu xaq u leeyahay inuu aqbalo ama diido codsiga maqnaanshaha cudur daarka ah. Fadlan arag Siyaasada Gollaha Dugsiga #519 si aad u hesho xog dheeraad ah.

Maqnaanshaha waxaa loo qeexaa sidaan soo socota:

| Maqnaanshaha cududaarka loo qaatay waxaa kamid ah: | Maqnaanshaha cududaarka aan loo qaadan waxaa kamid ah: |
|---|---|
| ● Xanuunka ay xaqiijiyeen Waalidka/Dhakhtarka<br>● Xaaladaha Degdega ah ee Qoyska<br>● Ballamaha La qabtay<br>● Maalmaha Fasaxa ee Diinta<br>● Ballamaha Caafimaadka/Ilkaha<br>● Hawlaha Dugsigu maamulo<br>● Dalxiisyada qoyska ee Horey loo sii qorsheeyay<br>● Ganaaxyada<br>● Kasoo muuqashada Maxkamad<br>● Xaalado Gaar ah<br>● Cimilo aad u xun<br>● Dhibaatooyin la xariira gaadiidka ay bixiso degmo dugsiyeedka | ● Dhibaatada ku timaada gaariga<br>● Booqasho<br>● Hurdo la tagida ama haddii saacadaha qofka kicin<br>● Adeeg doonasho<br>● Tababarka darawalnimada<br>● Haddii qofka looga baahan yahay guriga<br>● Ka tagista dugsiga inta lagu jiro maalinta ayadoon oggolaansho laga helin dugsiga<br>● Daryeelida ilmo<br>● Waayista baska<br>● Shaqo<br>● Wicitaan la'aanta waalidka/masuulka si ay u xaqiijiyaan maqnaanshaha<br>● Shaqsi (aan wax sabab ah la bixin)<br>● Ka maqnaanshaha dugsiga sabab macquul ah la'aanteed<br>● Baahida qurxinta shaqsi ahaaneed<br>● Maqnaansho kasta oo kale oo ay kujiraan xaadiritaanka nidaamyada dugsiga gaarka ah |

Fadlan kala xiriir macalinka fasalka ardaygaaga maqnaansho kasta oo horey loo qorsheeyay. Macallimiintu UMA baahna inay ardayda siiyaan shaqada dugsiga kahor maqnaanshaha. Ardaygu waxay heli doonaan shaqo soo kabid ah kadib marka ay dugsiga dib ugu soo laabtaan.

Dhammaan dugsiyadeena K-12 waxay isticmaalaan foomamka xaadiritaanka si ay maqnaanshaha ugu soo gudbiyaan. Fadlan wac khadka xaadiritaanka si aad u soo sheegto maqnaanshaha ama maqnaanshaha ardaygaaga ku diiwaangeli aabka ParentVUE ama oonleenka.

- Dugsiga Hoose ee Columbus: 651-982-8905
- Dugsiga Dhexe ee Forest View: 651-982-8275
- Dugsiga Dhexe ee Lino Lakes: 651-982-8852
- Dugsiga Dhexe ee Linwood: 651-982-1956
- Dugsiga Hoose ee Scandia: 651-982-3399
- Dugsiga Hoose ee Wyoming: 651-982-8068

Celcelis ahaan ardayda gobolka Minnesota waxay seegaan dugsiga wadar ahaan todoba (7) maalmood, ayagoon wax cudurdaar haysan iyo/ama haysta cudurdaar, sannad dugsiyeedka. Ardayda aan imaan dugsiga wax ka badan todobo maalmood, haddii ay fasax haystaan ama aysan haysanba, waxaa loo arkaa maqnaansho saa'id ah. Haddii ay jirto caqabad ku aadan xaadiritaanka waxaa kula soo xariiri doona dugsiga. Fadlan samee dadaal kasta si aad kor ugu qaado xaadiritaanka. Waxaa nalooga baahan yahay inaan u sheegno maqnaanshiyaha xad dhaafka ah degmada uu ardaygu kunool yahay maadaama uu jiri karo dayac waxbarasho iyo maqnaanshaha suurtagalka ah.

## Xanuunka ama Dhaawaca

Haddii ilmuhu muujiyo calaamado muujinaya inuu xanuunsan yahay kahor inta uusan dugsiga tagin, ilmaha waa in lagu hayaa guriga.  Ilmaha galaya dugsiga wuxuu la kulmaa cuduro carruurnimo oo sii kordhaya.  Fadlan cunugaaga ku haay guriga waqtiga uu ku taliyay dhakhtarku.

## Xayawaanada jooga Dayrka Dugsiga

Siyaasada Gollaha Dugsiga #706waxay sheegaysaa: "Si loo sugo badqabka ardayda iyo bulshada, xoolaha looma ogolo dayrka

dugsiga ilaa ogolaansho hore laga helo maamulaha dhismaha ama Agaasimaha Waxbarashada Bulshada mahee". Fadlan dugsiga usoo dir qoraal aad ku codsanayso oggolaanshaha inaad keento xayawaan. Xataa haddii oggolaanshaha loo helo in xayawaanka loo ogolaado inuu joogo barxadda dugsiga, looma oggolaan doono xayawaanka gudaha dhismaha sababo la xariira caafimaadka iyo badqabka. Sidaa daraadeed, haddii aad doonayso inaad codsato oggolaansho ah inaad dugsiga keento xayawaan rabaayad ah, fadlan samee qabanqaabo si aad sidaas u samayso marka cimiladu ku habboon tahay oo banaanka loo bixi karo.

Baahida arday kasta ee adeegga xoolaha waa in lagala hadlo maamulaha dhismaha.

## Xeerka Anshaxa Ardayga

Xeerka Anshaxa Ardayda waxaa fasalka dib loogu eegaa billoowga sannad kasta. Fadlan arrintan kala hadal ardaygaaga.

## Xeerka Dharka

Habka Labiska Ardayga ama lebiska gaarka ah ee soo bandhigaya khatarta cad ee caafimaadka iyo badqabka ardayga, sababa ama suurtagal u ah inay keento faragelin shaqada, ama abuurta khalkhal fasalka ama dugsiga. Kuwa soo socdaa waa ka mamnuuc hantida dugsiga ama dhacdooyinka dugsigu maalgeliyo. Maamulayaasha dhismayaasha dugsiyadu waxay qaadan karaan heerar xadidan oo dheeraad ah. "Hantida Dugsiga" waxaa lagu qeexaa sida dhismooyinka dugsiga, dhulalka, oo ay kujiraan meelaha baabuurta la dhigto iyo basaska dugsiga.

- Xirashada ama muujinta calanka isku dhafka, swastika iyo calamadaha KKK.
- Dharka muujiya ama kor u qaada:
  - tubaakada, khamriga, daroogada, ama qoraalada iyo fariimaha xadgudubka ah, sawirada ama calaamadaha.
  - xadgudubka, luuqada af xumada ah ama sawirada.
  - muujiya galmo iyo/ama luuqado af xumo ah iyo/ama sawiro.
- Dhar aan muujineen dhexda, barida iyo dharka hoos laga xirto. Labiska ay degmadu ansixisay ee ciyaaraha dugsiga waxa laga yaabaa in laga reebo siyaasadaan. Labiska dabaasha ama xiisadaha biyaha ku saleysan ama hawlaha waa inay buuxiyaan shuruudaha ay dejiyeen dhismayaasha dugsiga.

## Xiriirka dugsiga

Marka ay soo baxaan su'aalo la xiriira manhajka, anshaxa ama habraacyada, waalidiinta waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay kala hadlaan arrinta shaqaalaha dugsiga ku lugta leh. Shaqaalahaaga dugsiga hoose ayaa ugu fiican inay ka jawaabaan su'aalahaaga oo ay kaa caawiyaan xallinta dhibaatada ku saabsan waxbarashada ilmahaaga. Waqtiga ugu wanaagsan ee lagu gaari karo macalimiinta waa 8:00 - 9:00 subaxnimo.

- Wicitaannada la sameeyo inta lagu jiro maalinta dugsiga waxay tagi doonaan fariinta codka waxaana lagu soo celin doonaa sida ugu dhakhsaha badan.
- Fadlan wac xafiiska weyn fariimaha "Waqtiga xasaasiga ah" inta lagu jiro maalinta dugsiga. Xafiisku wuxuu markaas fariinta u gudbin doonaa fasalka.
- Haddii aad wacayso wax ku saabsan kasoo qaadida dugsiga kadib ama ballamaha, fadlan soo wac sida ugu dhakhsaha badan maalintii.  Aad bay u adagtahay in la dhiibo fariimaha la helo wixii ka dambeeya 3:00 galabnimo.
- Xafiiskeena waxaa la furi doonaa laga bilaabo 7:45 subaxnimo ilaa 4:15 galabnimo. Haddii aad soo wacdo marka xafiisku xiran yahay, waxaad awoodi doontaa inaad ku dhaafto cod duuban.

## Xiritaanka Dugsiga ee Xaaladaha Degdega ah

Waxaan dooneynaa inaan hubinno inaad haysatid macluumaadka aad u baahan tahay ee ku saabsan xiritaanka degdegga ah ee cimilada, daahitaanka, iyo dugsi xirista hore. Fadlan ogoow, in go'aamada lagu xirayo dugsiga si dhab ah ayaa loo qaataa waxaana isticmaalnaa xiritaano, dib u-dhac, iyo joojin hore marka loo baahdo kaliya.

Haddii dugsiga la xiro ama la sii daayo goor hore duruufo cimilo la xariirto awgood, waxqabadyada Waxbarashada Bulshada iyo ciyaaraha fudud ee Dugsiga Sare ayaa la joojiyaa ilaa si kale loogu xuso farriinta degdegga ah maahee.

Marka aan Ogeysiino Qoysaska iyo Shaqaalaha Xog ku saabsan Xiritaanada Degdegga ah ee Cimilada, Dib u dhigista, iyo Xirista Dugsiga ee Hore

- Go'aanka lagu joojinaayo ama lagu daahinaayo dugsiga waxaa la gaaraa sida ugu dhaqsiyaha badan ee macquulka ah haddii macluumaad muhiim ah la heli karo.
- Waxaa la gaari doonaa go'aanka xirista hordhaca ah inta lagu jiro maalin dugsiyeedka marka cimiladu iyo xaaladaha wadada ay ardayda u noqdaan badqab la'aan ayna sii wadi waayaan dhammaadka maalinta dugsiga.

Sida aan Ogeysiino Qoysaska iyo Shaqaalaha Xog ku saabsan Xiritaanada Degdegga ah ee Cimilada, Dib u dhigista, iyo Xirista Dugsiga ee Hore

- Fariinta Duuban ee ootamaatiga ah (fadlan xaqiiji in dhammaan xogta xiriirka ay tahay sax ayna tahay tii ugi dambeysay ee ParentVue.)
- Fariinta Qoraalka SMS
- Iimaylka
- Warbaahinta Bulshada: Waxaan ogeysiisyada kasoo diri doonaa ciwaanadeena.
- Boggaga Webka: Dhammaan boggaga interneetka ee dhismaheena waxaa lagu cusboonaysiin doonaa macluumaadka xiritaanka ee boggaga hore.

Fadlan hasoo wicin xafiiska dugsiga. Fadlan hubi in carruurtaada la baro waxa la sameeyo haddii mid kamid ah xaaladahaan ay dhacaan.

## Xogta Xiriirka Degdega ah

Xogta Xiriirka Degdega ah wuxuu muhiim u yahay ilmo kasta. Haddii ilmo xanuunsado ama ku dhaawacmo dugsiga, waxaa marka koowaad lala xariiri doonaa waalidka. Haddi dugsigu awoodi waayo inuu waalidka la xiriiro, waxa la wici doona dadka kale ee xaashida degdega ah ku jira. Fadlan ogeysii dugsiga marka ay isbadel ku yimaado lambarada telefoonada iyo dad kale ay dhacaan sannad dugsiyeedka. Fadlan, sannad kasta ama marka ay isbeddello dhacaan ka cusboonaysii ParentVue macluumaadka dadka lala xiriirayo xaaladaha degdegga ah.

.